{«DateLetterGenerated»}

{«PropertyOwnerName»}
{«MailAddress»}
{«MailCity», «MailState» «MailZip»}

Mudane/Marwo {«PropertyOwnerName»}:

Warqadaan waxay ku ogeysiinaysaa in markii ay ahayd {«LHCOdate»}, amarka Xakamaynta Khatarta Sunta Dalawandiga lagu soo saaray guriga ku yaala {«PropertyAddress»}. Amarka ayaa lagugu soo saaray waayo magacaan ayaa ugu qoran diiwaannada {«CountyName»} guryaha ee degmada inuu yahay mulkiilaha guriga. Ohio Department of Health ayaa dhawaan heshay xog sheegaysa in aad qaadatay sabarloogada mulkiyada guriga adoo ku helay la wareegid bangi ama wareejin. Xeerka Cusub Qaybta 3742.38 ayaa sheegaaya in mulkiilaha guriga ay qasab tahay inuu kala shaqeeyo Agaasimaha Caafimaadka ama Gudiga Caafimaadka xakamaynta khatar kasta oo sunta dalawandiga ah oo lagu cadeeyay amarkaas. Maadaama aad tahay mulkiilaha hadda ee guriga, waxaad masuul ka tahay ku dhaqanka amarka; sidaas awgeed, nuqulkaan kamid ah Amarka Xakamaynta Khataraha Sunta Dalawandiga iyo Qiimeynta Khatarta Sunta Dalawandiga ee Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ayaa laguu soo dirayaa. Waxaa halkaan lagugu amrayaa inaad xakamayso khataraha sagaashan (90) maalmood gudahood kadib helitaanka amarkaan.

Waxaa qasab kugu ah inaad ka doorato qaabka xakamaynta dookhyada kuu furan ee ku qoran liiska lifaaqa ku jira oo ciwaankiisu yahay *"Xakamaynta Khatarta Sunta Dalawandiga–Xulashada Qaabka."* Foomka waa in lagu soo ceshaa kahor biloowga shaqada xakamaynta khatarta sunta dalawansiga {«HDRepresentative»} fakis ahaan ama iimeylka loogu diraa {«HDphone»} ama {«HDemail»}.

Maadaama aad tahay mulkiilaha, waa inaad qaadaa talaabooyin lagu xakamaynaayo khataraha sunta dalawansiga kuwaasoo ku qoran amarkaan adoo raacaaya Cutubka 3742. ee Xeerka Cusub iyo Cutubyada 3701-30 iyo 3701-32 ee Xeerka Maamulka Ohio. Sida ku cad xeerka 3701-32-03(A)(14) ee Sharciga Maamulka Ohio, shaqada xakamaynta khatarta sunta dalawansiga waa inuu sameeyaa qof ruqsad ka haysta Ohio kaasoo ah qandaraaslaha maaraynta sunta dalawandiga.

Marka la dhameeyo shaqada xakamaynta khatarta sunta dalawandiga, qiimeynta xaqiijinta ah waa in lagu baasaa. Qiimeynta xaqiijinta ah waa inuu sameeyaa qiimeeyaha khatarta dalawandiga ama baaraha dalawandiga oo rugssad ka haysta Ohio. Haddii la adeegsado xakamaynada ku meel gaarka ah (mudada gaaban) si loo xakameeyo khataraha waa inaad soo gudbisaa "Qorshaha Kormeerka iyo Dayactirka Joogtada ah (OMM)." Waa inaad keentaa nuqulka warbixinta qiimeynta xaqiijinta ah iyo qorshaha OMM, haddii uu jiro kuna soo gudbisaa{«HDRepresentative»} fakiska ama iimelka adoo adeegsanaaya lambarka fakiska ama ciwaanka iimeylka ee kor ku qoran.

Marka la go'aansho in khataraha dalawandiga si sugan loo xakameeyaa, Ohio Department Of Health ayaa soo saari doonta kuuna soo diraysa "Ogeysiiska Ku dhaqanka" kaasoo kaa qaadaaya amarka xakamaynta khataraha sunta dalawandiga. Ilaa taas laga gaaraayo, guriga waxaa saarnaan doona amarkaan xakamaynta.

Ku fashilmida ku dhaqanka amarkaan ayaa keenaysa amar mamnuucaaya in guriga loo adeegsado deegaan, daryeelka carruurta ee maalintii ama dugsi ahaan iyo in lagu dhajiyo guriga boor uga digaaya dadwaynaha inaan gurigu amaan u ahayn aadanaha.

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto amarkaan, fadlan ka wac {«HDRepresentative»} lambarka {«HDphone»}.

Si daacadnimo leh,

{«HDRepresentativeName»}
{«HDRepresentativeTitle»}
{«HDName»}